

TARTANKA QORMOYINKA 20-AAD EE GUDDIGA CAALAMIGA AH EE LAANQEYRTA CAS EE JAAMACADHA BARIGA AFRIKA



SU'AASHA

“Xabsi-dhigidda ay sameeyaan kooxaha hubeysan oo aan dowliga aheyn ayaa badanaa laga la kulmaa caqabado muuqda iyo kuwo dhinaca sharciga ah. Caqabadaha ayaa inta badan ka dhasha kaladuwanaanshaha weyn ee u dhaxeeya kooxaha hubeysan ee aan dowliga aheyn: kaladuwanaanshahan ayaa la xiriira hababka ay u howlgalaan oo kala duwan, qaab dhismeedka ururrada, awoodaha muuqda, aqoonta iyo aqbalaadda Sharciga Caalamiga ah, iyo waxa dhaqaajiya/dhiirrigaliya ama hab-fikirka... Arrimo badan oo aad u dhib badan ayaa ka dhasha Xabsi-dhigidda aan loo aaba yeelin; Xeerarka IHL ee maxkamadeynta caddaaladda ah; ilaalinta nidaamyada looga baahanyahay Xabsi-dhigidda; iyo mamnuucidda ka dhanka ah wareejinta maxaabiista iyada oo lagu tumanayo Xeerka mamnuucaya qasab dib ugu celinta qaxootiga.” – *Warbixinta ICRC ee 2019 ee ku saabsan Xeerka Caalamiga ah ee Bani'aadamnimada iyo caqabadaha Colaadaha Hubeysan ee Casriga ah.*

Xorriyad ka qaadistu waa dhacdo si guud uga dhacda xaaladaha colaadda hubeysan, oo ay ku jiraan kuwa ay ku lug leeyihiin dhinacyada aan Dowliga aheyn ee colaadaha hubeysan ee aan caalamiga aheyn. Kororka kooxaxaha hubeysan ee aan dowliga aheyn, iyo baahsanaanta dhinac socota ee colaadaha hubeysan ee aan caalamiga aheyn, ayaa dhalisay in ay kooxaxaha noocaas ahi dad badan xiraan. Xaqiiqdii, in ka badan 80 kooxaha hubeysan ah ayaa maxaabiis ku heysta dalalka ay ICRC-du ka howlgasho. Iyada oo ay arintani jirto, way caddahay in sharciga loogu talagalay in uu qaabeeyo xorriyad ka qaadista ay sameeyaan kooxaha hubeysan inta lagu jiro colaadaha hubeysan ee aan caalamiga aheyn, uu aad u koobanyahay baaxad ahaan iyo si gaar ahaaneedba.

Si qoto dheer u falanqee kana dood caqabadaha sharci iyo kuwa muuqda/waaqica dhabta ah ka turjumaya ee lagala kulmo xabsi-dhigidda ay sameeyaan kooxaha hubeysan inta lagu jiro colaadaha hubeysan.

TILMAAMAHA

- Tartanku waxa uu u furanyahay dhammaan ardeyda heerka koowaad ee jaamacadaha Bariga Afrika.
- Qoraalladu waa in ay kumbuyuutar ku qornaadaan, oo si wanaagsan tixraaca loogu sameeyo loona qaabeeyo, sidoo kalena la xusaa buugaagtii laga soo xigtay.
- Qoraalladu waa in aysan ka badnaamin 4000 oo eray (oo ay ku jiraan qoraallada beyjajka hoos looga qoro oo aysan ku jirin buugaagta wax laga soo xigto)
- Qoraal kasta oo lagu helo in la khiyaanay waa laga reebi doonaa taranka.
- Qoraalka iyo nuqul aqoonsiga ardeyga ah waa in lagu soo diraa xafiiska Nairobi ugu danbeyn 30ka Juun 2022 iyada oo la adeegsanayo Email-ka (nai_IHLmailbox@icrc.org).
- Soo dirista wixii xilligaa ka danbeeya lama aqbali doono.
- Guuleystaha tartanka ayaa waxa uu heli doonaa abaalmarin lacageed. Waxaa kale oo abaalmarin heli doona dadka gala kaalmaha 2aad iyo 3aad, iyo sidoo kale qoraalka ugu wanaagsanaada dal kasta.

HAGAHA QIIMEYNTA

Ka qeybgaleyaasha waxaa lagu qiimeyn doonaa dooddooda maan-galka ah, qoto-dheerida ay jawaabhooda u sameeyaan, qaab-dhismeedka qoraalka, iyo muujinta aqoonta ay u leeyihiin mowduuca ay ka hadlayaan. Mid kasta oo ka mid ah hal-beegyada ayaa lagu bixin doonaa dhibco sida hoos ku xusan:

Aqoonta mowduuca	Hab-fikirka xeesha dheer iyo falanqeynta	Qaab-dhismeedka, tixraaca, iyo daliilka cilmi-baarista	Tiro Guud
40	30	30	100

ABAAL-MARINNADA LACAGEED

- Qoraalka ugu wanaagsan – CHF 350
- Qoraalka 2aad ee ugu wanaagsan – CHF 250
- Qoraalka 3aad ee ugu wanaagsan – CHF 100
- Qoraalka ugu wanaagsan wadan kasta – CHF 50

Wixii faah-faahin dheeri ah fadlan kala xiriir:

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas
 Waaxda Warbaahinta, Ergada Soomaaliya, Wadjir District, Buulo Hubey Quarters
 Tel: 05844110 ama Mohamed Khalif +252907948803 / 252614243716
 Email: mkhalifibrahim@icrc.org www.icrc.org

ICRC